RAWDAH
YOUTH ORGANIZATION

"Centro Giovanile Rawdah per la formazione professionale, linguistica e delle competenze lavorative"

NOTA FINALE DEL CORSO DI FORMAZIONE
Warbixinta kama-dambeysta ah ee Tababarka

Formazione e Capacity Building per la Pace e la Sicurezza in Somalia
Tababar iyo Dhisidda Awoodda ee Nabadda iyo Amniga Soomaaliya

Sintesi dei contenuti, delle discussioni e delle raccomandazioni emerse
Soo koobidda nuxurka, doodaha iyo talooyinka ka soo baxay

Mogadiscio, 8–12 febbraio 2026

A cura di / Waxaa diyaariyey
dott. Ahmed Faghi Elmi
Presidente – Centro Giovanile Rawdah
per la formazione professionale, linguistica e
delle competenze lavorative



PARTE I
VERSIONE ITALIANA

NOTA FINALE DEL CORSO DI FORMAZIONE

"Formazione e Capacity Building per la Pace e la Sicurezza in Somalia"

Mogadiscio, Febbraio 12, 2026

1. Introduzione e contesto

Il presente documento costituisce la Nota finale di sintesi del corso di formazione articolato in sette moduli tematici, svoltosi a Mogadiscio dall'8 al 12 febbraio 2026, nell'ambito delle iniziative di capacity building, dialogo istituzionale e rafforzamento delle competenze rivolte a giovani, funzionari pubblici, accademici e rappresentanti della società civile.
Il percorso formativo è stato concepito con l'obiettivo di fornire strumenti analitici, concettuali e operativi per la comprensione delle trasformazioni dell'ordine internazionale contemporaneo, delle dinamiche dei conflitti e dei modelli di gestione politica e istituzionale in contesti fragili e divisi, con particolare riferimento alla Somalia e al contesto regionale del Corno d'Africa.

Attraverso un approccio interdisciplinare e partecipativo, il corso ha favorito un confronto aperto e strutturato tra partecipanti provenienti da differenti ambiti istituzionali e accademici, promuovendo la condivisione di esperienze, prospettive e riflessioni critiche sui temi della pace, della sicurezza, della governance e della cooperazione internazionale.

La presente Nota finale intende:

- documentare i principali contenuti emersi nei sette moduli formativi;
- valorizzare le discussioni e i contributi dei partecipanti;
- offrire una base di riflessione e orientamento per decisori pubblici, istituzioni formative e attori della società civile;
- formulare raccomandazioni operative utili a rafforzare future iniziative nel campo della pace e della sicurezza in Somalia.

2. Quadro istituzionale e partenariati

Il corso di formazione si inserisce in un più ampio quadro di cooperazione internazionale, dialogo accademico e rafforzamento delle competenze istituzionali, promosso da una rete articolata di attori della società civile, del mondo accademico e delle istituzioni italiane e somale.

L'iniziativa è stata realizzata grazie al finanziamento del Ministero degli Affari Esteri e della Cooperazione Internazionale ed è stata promossa da ANOLF Regionale FVG APS, in partnership con Associazione

SAGAL APS, attraverso una stretta collaborazione tra enti promotori italiani, partner locali somali e istituzioni accademiche.

Hanno sostenuto e collaborato all'iniziativa, tra gli altri:

- Università degli Studi di Trieste
- Università Nazionale Somala
- Ministero del Lavoro e degli Affari Sociali – Somalia
- Ministero delle Dotazioni e degli Affari Religiosi – Somalia
- Ambasciata d'Italia a Mogadiscio
- Ambasciata della Somalia a Roma
- ANOLF – Associazione Nazionale Oltre Le Frontiere ETS
- Osservatorio Internazionale sulla Legalità di Trieste

Il Centro Giovanile Rawdah per lo sviluppo professionale, linguistico e delle competenze ha svolto il ruolo di partner locale e sede di riferimento, facilitando il coinvolgimento dei giovani e garantendo uno spazio di confronto sicuro, inclusivo e orientato allo sviluppo delle competenze.
Il percorso ha inoltre beneficiato del contributo di docenti ed esperti con consolidata esperienza nei campi delle relazioni internazionali, della gestione dei conflitti e dell'analisi istituzionale.

L'approccio metodologico adottato ha privilegiato una didattica partecipativa, fondata sull'interazione tra lezioni frontali, discussioni plenarie e momenti di dialogo aperto, favorendo non solo la trasmissione di conoscenze, ma anche lo sviluppo di capacità critiche e analitiche utili al contesto somalo e regionale.

3. Sintesi dei Moduli Formativi

Modulo 1 - The Transition to a Post-Liberal International Order: Trends and Dynamics





Il primo modulo ha fornito il quadro teorico di riferimento dell'intero percorso formativo, concentrandosi sulle trasformazioni dell'ordine internazionale contemporaneo e sul progressivo superamento del modello del Liberal International Order (LIO).

La discussione ha preso avvio dall'analisi delle fondazioni e delle principali assunzioni del LIO, evidenziandone i presupposti normativi, istituzionali ed economici, nonché il ruolo svolto dagli attori occidentali nella sua costruzione e nel suo mantenimento nel periodo post-Guerra Fredda.

Ampio spazio è stato dedicato all'esame dei fattori strutturali di cambiamento, tra cui:

- gli spostamenti di potere a livello globale;
- la crescente contestazione delle norme internazionali;
- l'indebolimento e l'erosione delle istituzioni multilaterali tradizionali.


I partecipanti hanno discusso il passaggio da una fase di unipolarismo a un contesto caratterizzato da frammentazione sistemica, multipolarismo e nuove forme di cooperazione selettiva, quali il minilateralismo e il multilateralismo competitivo.
È emerso il ruolo crescente delle middle powers e dei Paesi del Global South, sempre più attivi nel ridefinire agende e modelli di governance internazionale.

Il dibattito ha inoltre evidenziato come tali trasformazioni incidano direttamente sui contesti fragili, generando nuove opportunità ma anche rischi legati alla competizione tra attori esterni e alla debolezza delle istituzioni statali.

Concetti chiave emersi:

- Post-liberal order
- Strategic autonomy
- Norm contestation
- Systemic fragmentation

Modulo 2 - Federalism and Decentralization: Institutional Responses in Fragile and Divided States





Il secondo modulo ha affrontato il tema del federalismo e della decentralizzazione come risposte istituzionali alla gestione del potere politico in Stati fragili e società divise.

L'analisi si è concentrata sui concetti fondamentali di federalismo e decentralizzazione, evidenziando come tali modelli possano favorire inclusione politica, rappresentanza territoriale e una più equilibrata distribuzione del potere tra centro e periferia.

È stato approfondito lo studio dei meccanismi di condivisione verticale del potere e delle relazioni tra autorità centrali e livelli sub-statali, spesso caratterizzate da tensioni, ambiguità normative e competizione per risorse e legittimità.

La decentralizzazione è stata analizzata come possibile strumento di gestione dei conflitti, pur evidenziando i rischi legati a processi non accompagnati da adeguate capacità istituzionali, quali:

- frammentazione del potere statale;
- cattura delle istituzioni da parte di élite locali;
- indebolimento della coesione nazionale.

Nel contesto somalo, il federalismo è emerso come una necessità politica ma anche come una sfida strutturale che richiede un delicato equilibrio tra autonomia territoriale e rafforzamento dello Stato centrale.

Concetti chiave emersi:

- Vertical power-sharing
- Limited state
- Territorial governance
- Institutional resilience

Moduli 3–7 – Dinamiche regionali, processi politici e gestione dei conflitti





I moduli dal terzo al settimo hanno approfondito in modo progressivo e integrato le dinamiche regionali, politiche e istituzionali dei conflitti contemporanei, ponendo l'accento sui meccanismi di instabilità, sulle opzioni di gestione del conflitto e sui modelli di mediazione in contesti caratterizzati da frammentazione politica e pluralismo identitario.

Modulo 3 – Dimensione regionale e sicurezza
Il terzo modulo ha introdotto la prospettiva dei Regional Security Complexes, evidenziando come la sicurezza degli Stati sia strettamente interconnessa a quella dei Paesi vicini.





Sono stati analizzati:

- i meccanismi di interdipendenza della sicurezza;
- i fenomeni di spillover dei conflitti;
- la regionalizzazione delle crisi;
- il coinvolgimento di attori extra-regionali.

Particolare attenzione è stata dedicata al contesto del Corno d'Africa, dove le dinamiche di sicurezza non possono essere comprese esclusivamente a livello nazionale, ma devono essere interpretate in chiave regionale e transnazionale.

Modulo 4 – Processi elettorali e fratture politiche

Il quarto modulo ha esaminato il ruolo delle elezioni nelle società divise, analizzando il potenziale stabilizzante ma anche destabilizzante dei processi elettorali.



Sono stati discussi:

- i sistemi elettorali e le loro implicazioni politiche;
- le fratture etniche, claniche, religiose e ideologiche;
- il rischio di polarizzazione;
- la gestione delle aspettative collettive;
- le crisi post-elettorali e la violenza politica.

È emerso come la legittimità elettorale e la credibilità delle istituzioni rappresentino elementi fondamentali per la stabilità politica.

Modulo 5 – Tipologie di conflitto e modelli di gestione

Il quinto modulo ha fornito una classificazione delle principali tipologie di conflitto contemporaneo, tra cui:

- guerre civili;
- conflitti per procura;
- conflitti ibridi;
- dinamiche di esternalizzazione della violenza.

Sono state analizzate le cause strutturali dei conflitti, tra cui:

- disuguaglianze economiche;
- rivendicazioni identitarie;
- debolezza istituzionale;
- interferenze esterne.

È stato inoltre approfondito il tema delle economie di guerra e del loro ruolo nella persistenza dei conflitti.

Modulo 6 – Architetture istituzionali e soluzioni consociative

Il sesto modulo ha affrontato il tema delle soluzioni consociative e dei modelli di power-sharing nei contesti divisi.





Sono stati analizzati:

- accordi di condivisione del potere;
- meccanismi di veto;
- compromessi istituzionali;
- rischi di paralisi decisionale;
- istituzionalizzazione delle identità politiche.

Il dibattito ha evidenziato la necessità di soluzioni flessibili e adattabili all'evoluzione del contesto politico e sociale.

Modulo 7 – Politica estera e mediazione dei conflitti
Il settimo modulo ha analizzato la mediazione come strumento di politica estera in un ordine internazionale frammentato e multipolare.





Sono stati discussi:

- il ruolo degli Stati e delle potenze medie;
- la diplomazia di nicchia (niche diplomacy);
- le organizzazioni regionali;
- i formati ad hoc di mediazione;
- la mediazione come strumento di status-seeking internazionale.

È stata sottolineata l'importanza di approcci inclusivi, coordinati e sensibili alle dinamiche locali.

Concetti chiave trasversali

- Interdipendenza della sicurezza e regionalizzazione dei conflitti
- Polarizzazione politica e legittimità istituzionale
- Conflitti ibridi e dinamiche per procura
- Power-sharing e compromesso istituzionale
- Mediazione strategica e ruolo delle potenze regionali

4. Temi trasversali emersi dalle discussioni





Nel corso delle attività formative e delle discussioni plenarie, sono emersi temi trasversali di particolare rilevanza per la comprensione delle sfide legate alla pace, alla sicurezza e alla governance in Somalia.

Tra questi:

- l'impatto delle trasformazioni dell'ordine internazionale sui contesti fragili;
- la centralità delle istituzioni e della buona governance;
- la gestione delle identità e la promozione della coesione sociale;
- il rapporto tra processi politici, aspettative collettive e legittimità;
- la dimensione regionale dei conflitti;
- il ruolo strategico dei giovani nei processi di pace e sicurezza.

È emersa con chiarezza la necessità di un approccio integrato che connetta dimensione nazionale, regionale e internazionale.

5. Raccomandazioni finali

Alla luce dei contenuti affrontati nei sette moduli, il presente documento formula raccomandazioni operative articolate per ambiti di intervento.

1. Raccomandazioni alle istituzioni pubbliche
    - Rafforzare la capacità istituzionale e amministrativa a livello centrale e sub-statale;
    - Promuovere chiarezza normativa e coordinamento intergovernativo;
    - Sviluppare modelli di governance inclusiva;
    - Integrare la dimensione regionale nelle politiche di sicurezza;
    - Promuovere processi elettorali trasparenti e credibili.
2. Raccomandazioni alle università e ai centri di formazione
    - Rafforzare programmi interdisciplinari su pace e sicurezza;
    - Favorire il dialogo tra ricerca e politiche pubbliche;
    - Sostenere cooperazione accademica internazionale;
    - Investire nello sviluppo di competenze analitiche.
3. Raccomandazioni alla società civile e ai giovani
    - Incentivare la partecipazione attiva nei processi di dialogo;
    - Investire nello sviluppo di competenze civiche e leadership;
    - Promuovere cultura del confronto pacifico;
    - Rafforzare iniziative di coesione sociale.

6. Conclusioni e prospettive future





Il corso ha rappresentato un'importante occasione di apprendimento condiviso, dialogo critico e confronto interdisciplinare.

Ha contribuito a rafforzare la consapevolezza analitica e istituzionale dei partecipanti, offrendo strumenti utili per affrontare le sfide contemporanee.

Gli enti promotori confermano la propria disponibilità a proseguire e rafforzare questo percorso, promuovendo nuove iniziative orientate allo sviluppo delle competenze, al dialogo istituzionale e alla costruzione di una pace duratura e sostenibile in Somalia.

Nota finale – Dichiarazione conclusiva
La presente Nota finale intende offrire un contributo costruttivo al dibattito pubblico e istituzionale, fungendo da strumento di orientamento e riferimento per decisori politici, istituzioni accademiche, società civile e giovani impegnati nei processi di pace, sicurezza e governance.

Mogadiscio, febbraio 2026

Dott. Ahmed Faghi Elmi
Presidente
Centro Giovanile Rawdah per la formazione professionale,
linguistica e delle competenze lavorative.

PARTE II
NUQULKA AF-SOOMAALIGA

WARBIXINTA KAMA-DAMBAYSTA AH EE TABABARKA

"Tababar iyo Dhisidda Awoodda ee Nabadda iyo Amniga Soomaaliya"

Muqdisho, Febraayo 12, 2026

1. Hordhac iyo Ujeeddo

Warbixintani waa qoraalka kama-dambaysta ah ee tababar aqooneed oo ka koobnaa toddobo qaybood, laguna qabtay magaalada Muqdisho intii u dhaxaysay 8–12 Febraayo 2026. Tababarku wuxuu qayb ka ahaa dadaallada lagu xoojinayo awoodda hay'adaha, kobcinta wada-hadalka dowladeed iyo horumarinta xirfadaha dhalinyarada, shaqaalaha dowladda, aqoonyahannada iyo bulshada rayidka.

Ujeeddada tababarku waxay ahayd in la bixiyo aqoon qoto dheer iyo qalab falanqayn oo sare, si kor loogu qaado fahamka isbeddellada nidaamka caalamiga ah, dabeecadaha colaadaha iyo qaababka maamul ee ku habboon dalalka leh xaalado jilicsan, gaar ahaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo deegaanka Geeska Afrika.

Habka loo adeegsaday wuxuu ahaa mid aqooneed oo ka-qaybgal ku saleysan, dhiirrigelinaya wada-hadal cilmiyeed, is-weydaarsi aragtiyo iyo falanqayn ku dhisan tixgelin iyo wada-faham.

Warbixintani waxay ujeeddadeedu tahay:

- in si rasmi ah loo diiwaangeliyo nuxurka iyo casharrada laga bartay tababarka;
- in la muujiyo kaalinta iyo ka-qaybgalka firfircoon ee ka-qaybgalayaasha;
- in ay noqoto dukumeenti tixraac u ah hay'adaha dowladeed, kuwa waxbarashada iyo bulshada rayidka;
- in la soo jeediyo talooyin wax ku ool ah oo lagu xoojin karo nabadda iyo amniga Soomaaliya.

2. QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADEED IYO ISKAASHIGA

Mashruucan waxaa maalgeliyay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Talyaaniga, waxaana hormuud ka ahaa ANOLF Regionale FVG APS oo kaashanaysa SAGAL APS iyo Xarunta Dhallinyarada Rawdah.

Mashruuca waxaa ka qayb qaatay jaamacado, wasaarado iyo hay'ado bulsho rayid ah oo Talyaani iyo Soomaali ah.

Xarunta Dhallinyarada Rawdah waxay ahayd lammaanaha maxalliga ah, iyadoo fududeysay ka qaybgalka dhalinyarada isla markaana bixisay jawi ammaan ah oo wada-hadal iyo is-dhexgal leh.

3. SOO KOOBIDDA QAYBAHA TABABARKA

Qaybta 1 – U guurista nidaam caalami ah oo ka baxsan liberal order

Qaybtani waxay falanqeysay isbeddelada nidaamka caalamiga ah, hoos u dhaca nidaamkii liberal-ka iyo soo bixitaanka nidaam multipolar ah oo kala qaybsan.

Waxaa la falanqeeyay isbeddelka awoodaha caalamiga ah, muranka ku saabsan qawaaniinta caalamiga ah iyo doorka sii kordhaya ee dalalka awoodda dhexe leh iyo Global South.

Qaybta 2 – Federaalka iyo maamul-daadejinta
Waxaa la falanqeeyay federaalka sida xal hay'adeed oo ku habboon dalalka jilicsan, iyadoo la muujiyay fursadaha iyo khataraha ka iman kara kala qaybsanaanta iyo tabardarrida dowladda.

Qaybaha 3–7 – Amniga gobolka, colaadaha iyo dhexdhexaadinta
Qaybaha xigay waxay diiradda saareen:

- is-xirnaanta amniga gobolka
- doorashooyinka iyo kala qaybsanaanta siyaasadeed
- noocyada colaadaha (dagaallo sokeeye, dagaallo dadban, colaado isku dhafan)
- qaababka wadaagga awoodda
- dhexdhexaadinta caalamiga ah iyo doorka jilayaasha dibadda

Qaybaha 3–7 – Isbeddellada Gobolka, Geeddi-socodyada Siyaasadeed iyo Maaraynta Colaadaha

Qaybaha saddexaad ilaa toddobaad waxay si tartiib ah oo isku dhafan u falanqeeyeen isbeddellada gobolka, siyaasadeed iyo hay'adeed ee colaadaha casriga ah, iyagoo diiradda saaray hababka keenaya xasillooni-darro, fursadaha maaraynta colaadaha, iyo qaababka dhexdhexaadinta ee lagu dabaqo duruufaha leh kala qaybsanaan siyaasadeed iyo kala duwanaansho aqoonsi.

Qaybta 3 – Aragtida Gobolka iyo Amniga
Qaybtan saddexaad waxay soo bandhigtay aragtida Regional Security Complexes, iyadoo muujisay in amniga dalalka uu si dhow ugu xiran yahay amniga dalalka deriska la ah.

Waxaa la falanqeeyay:

- hababka is-ku-tiirsanaanta amniga;
- saamaynta colaadaha ka gudba xuduudaha (spillover);
- gobolaynta ama ku ururinta khilaafaadka heer gobol;
- ka-qaybgalka jilayaasha ka baxsan gobolka (extra-regional actors).

Fiiro gaar ah ayaa la siiyay xaaladda Geeska Afrika, halkaas oo arrimaha amniga aan lagu fahmi karin oo keliya heer qaran, balse ay u baahan yihiin in lagu eego aragti goboleed iyo mid ka gudubta xuduudaha qaranka.

Qaybta 4 – Geeddi-socodyada Doorashooyinka iyo Kala Qaybsanaanta Siyaasadeed
Qaybta afraad waxay qiimeysay doorka doorashooyinka ee bulshooyinka kala qaybsan, iyadoo la falanqeeyay awoodda ay u leeyihiin inay keeni karaan xasillooni ama xasillooni-darro.

Waxaa laga dooday:

- nidaamyada doorashooyinka iyo saameyntooda siyaasadeed;
- kala qaybsanaanta qabiil, qoomiyadeed, diimeed iyo fikir-ideolojiyeed;
- khatarta sii kordheysa ee kala fogaanshaha (polarization);
- maaraynta filashooyinka bulshada;
- qalalaasaha ka dhasha doorashooyinka iyo rabshadaha siyaasadeed.

Waxaa si cad u soo baxay in sharciyadda doorashooyinka iyo kalsoonida lagu qabo hay'adaha dowliga ahi ay yihiin tiirarka ugu muhiimsan ee xasilloonida siyaasadeed.

Qaybta 5 – Noocyada Colaadaha iyo Qaababka Maaraynta
Qaybta shanaad waxay soo bandhigtay kala soocidda noocyada ugu waaweyn ee colaadaha casriga ah, oo ay ka mid yihiin:

- dagaallada sokeeye;
- dagaallada wakiillada (proxy wars);
- colaadaha isku dhafan (hybrid conflicts);
- hababka dibedda loogu wareejiyo rabshadaha.
- Waxaa sidoo kale la falanqeeyay sababaha qaab-dhismeedka ee colaadaha, sida:
- sinaan la'aanta dhaqaale;
- sheegashooyinka aqoonsi;
- tabardarrida hay'adaha;
- faragelinta dibadda.

Waxaa si gaar ah loo xusay doorka dhaqaalaha dagaalka (war economies) iyo sida ay u sii dheereeyaan colaadaha.

Qaybta 6 – Qaab-dhismeedka Hay'adaha iyo Xalalka Wadaagga Awoodda
Qaybta lixaad waxay diiradda saartay xalalka consociational iyo qaababka wadaagga awoodda ee lagu dabaqo bulshooyinka kala qaybsan.

Waxaa la falanqeeyay:

- heshiisyada wadaagga awoodda;
- hababka diidmada (veto mechanisms);
- tanaasullada hay'adeed;
- khatarta curyaaminta go'aan-qaadashada;
- sharciyeynta iyo adkeynta aqoonsiyada siyaasadeed.

Doodaha ayaa muujiyay baahida loo qabo xalal dabacsan oo la jaanqaadi kara isbeddelada duruufaha siyaasadeed iyo bulsho.

Qaybta 7 – Siyaasadda Arrimaha Dibadda iyo Dhexdhexaadinta Colaadaha
Qaybta toddobaad waxay falanqeysay dhexdhexaadinta sida aalad siyaasadda arrimaha dibadda ah, gaar ahaan nidaam caalami ah oo kala qaybsan oo multipolar ah.
Waxaa laga dooday:

- doorka dowladaha iyo quwadaha dhexe;
- diplomasi gaar ah (niche diplomacy);
- ururrada goboleed;
- qaabab gaar ah oo dhexdhexaadin ah (ad hoc formats);
- dhexdhexaadinta sida aalad lagu xoojiyo sumcadda iyo maqaamka caalamiga ah.

Waxaa la adkeeyay muhiimadda qaababka ku dhisan wada-jir, isku-duwid iyo tixgelinta duruufaha maxalliga ah.

Fikradaha Muhiimka ah ee Isku Xiran:

1. Is-ku-tiirsanaanta amniga iyo gobolaynta colaadaha
2. Kala qaybsanaanta siyaasadeed iyo sharciyadda hay'adaha
3. Colaadaha isku dhafan iyo dagaallada wakiillada
4. Wadaagga awoodda iyo tanaasullada hay'adeed
5. Dhexdhexaadinta istiraatiijiga ah iyo doorka quwadaha goboleed

4. Mawduucyada Isku Xiran ee Ka Soo Baxay Doodaha

Intii lagu guda jiray hawlaha tababarka iyo doodaha guud, waxaa soo baxay mowduucyo isku xiran oo leh muhiimad gaar ah marka laga hadlayo fahamka caqabadaha la xiriira nabadda, amniga iyo maamul-wanaagga Soomaaliya.

Waxaa ka mid ahaa:

- Saameynta isbeddellada nidaamka caalamiga ah ee ku wajahan dalalka leh xaalado jilicsan;
- Doorka dhexe ee hay'adaha dowliga ah iyo muhiimadda maamul-wanaagga;
- Maaraynta aqoonsiyada kala duwan iyo dhiirrigelinta isku-duubnida bulshada;
- Xiriirka ka dhexeeya geeddi-socodyada siyaasadeed, filashooyinka bulshada iyo sharciyadda hay'adaha;
- Aragtiyaha gobolka ee colaadaha iyo isku xirnaanta amniga;
- Doorka istiraatiijiga ah ee dhalinyarada ee geeddi-socodyada nabadda iyo amniga.

Waxaa si cad u soo baxay baahida loo qabo hab isku dhafan oo isku xira heer qaran, heer gobol iyo heer caalami si loo wajaho caqabadaha jira si wax ku ool ah.

5. Talooyin Kama-Dambays ah

Iyadoo laga duulayo nuxurka iyo falanqaynta lagu soo bandhigay toddobada qaybood ee tababarka, dukumeentigan wuxuu soo jeedinayaa talooyin wax ku ool ah oo loo kala saaray dhinacyada ay khuseeyaan.

a) Talooyin ku Socda Hay'adaha Dowliga ah

- In la xoojiyo awoodda hay'adaha iyo maamulidda heer dowlad dhexe iyo heer dowlad-goboleed;
- In la kobciyo hufnaan sharciyeed iyo isku-duwid dowladeed oo heerar kala duwan ah;
- In la horumariyo qaabab maamul oo loo wada dhan yahay oo ku saleysan ka-qaybgal iyo caddaalad;
- In lagu daro aragtida gobolka marka la dejinayo siyaasadaha amniga;
- In la dhiirrigeliyo geeddi-socodyo doorasho oo hufan, la isku halayn karo oo lagu kalsoonaan karo.

b) Talooyin ku Socda Jaamacadaha iyo Xarunta Tababarka
   - In la xoojiyo barnaamijyo waxbarasho oo isku dhafan oo diiradda saaraya nabadda, amniga iyo maamul-wanaagga;
   - In la kobciyo wada-hadal u dhexeeya cilmi-baarista iyo dejinta siyaasadaha guud;
   - In la taageero iskaashi tacliimeed oo heer caalami ah;
   - In la maalgeliyo horumarinta xirfadaha falanqaynta iyo cilmiyeed.

c) Talooyin ku Socda Bulshada Rayidka iyo Dhalinyarada
   - In la dhiirrigeliyo ka-qaybgal firfircoon oo ku saabsan geeddi-socodyada wada-hadalka iyo dhismaha nabadda;
   - In la maalgeliyo horumarinta xirfadaha muwaadinimo iyo hoggaamineed;
   - In la kobciyo dhaqan ku dhisan wada-hadal nabadeed iyo is-ixtiraam;
   - In la xoojiyo dadaallada lagu horumarinayo isku-duubnida bulshada.

6. Gunaanad iyo Aragti Mustaqbal

Tababarkani wuxuu noqday madal muhiim ah oo lagu wadaagay aqoon, lagu qabtay dood cilmiyeed qoto dheer, isla markaana lagu xoojiyay is-fahamka iyo iskaashiga ka dhexeeya ka-qaybgalayaasha.

Wuxuu ka qayb qaatay xoojinta fahamka falanqayneed iyo mid hay'adeed, isagoo bixiyay qalab iyo aragtiyo wax ku ool ah oo lagu wajaho caqabadaha casriga ah.

Hay'adaha fuliyay mashruuca waxay si rasmi ah u muujinayaan diyaargarowgooda iyo go'aankooda ah in la sii wado lana xoojiyo dadaalladan, iyagoo horumarinaya barnaamijyo cusub oo ku wajahan kobcinta xirfadaha, xoojinta wada-hadalka hay'adaha iyo dhismaha nabad waarta oo waafaqsan horumarka joogtada ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qoraal Kama-Dambays ah – Bayaanka Gabagabada
Warbixintan kama-dambaysta ah waxay ujeeddadeedu tahay inay bixiso ka-qaybgal wax dhisaya oo ku wajahan doodda guud iyo tan hay'adeed, iyadoo noqoneysa dukumeenti hagid iyo tixraac u ah go'aan-qaadayaasha, hay'adaha tacliinta, bulshada rayidka iyo dhalinyarada ku hawlan geeddi-socodyada nabadda, amniga iyo maamul-wanaagga.

Muqdisho, Febraayo 2026

Dr. Ahmed Faghi Elmi
Guddoomiyaha
Xarunta Dhallinyarada Rawdah ee
Tababarka Xirfadaha, Luqaddaha iyo
Horumarinta Xirfadaha Shaqada.

RAWDAH
YOUTH ORGANIZATION

"Xarunta Dhallinyarada Rawdah ee Tababarka Xirfadaha, Luqaddaha iyo Horumarinta Xirfadaha Shaqada"



Waxaa diyaariyey
Dr. Ahmed Faghi Elmi
Guddoomiyaha Xarunta Dhallinyarada Rawdah ee Tababarka Xirfadaha, Luqaddaha iyo Horumarinta Xirfadaha Shaqada

UNIVERSITÀ DEGLI STUDI DI TRIESTE
Dipartimento Scienze Politiche e Sociali

Ambasciata d`Italia Mogadiscio
ANOLF
DEPARTMENT OF DIASPORA AFFAIRS
RAWDAH CONSULTING SOLUTIONS

rawdahyouth
+252 77 0 205020
rawdahyouth.org@gmail.com
www.rawdahyouth.org
De Martino Hospital area – opposite the Central Prison and the former British Embassy building